

# U diyaarinta Cunugaaga Imtaxaanaadka Guud

Imtaxaanaadka Guud waxaa uu kaga jiraa door mihiim ah Dugsiyada Dadweynaha ee Maraykanka. Cunugaaga waxaa laga yaabaa inuu qaato mid ama ka badan imtaxaanaadka guud ee gobolka ama dawlada fadaraaliga ah ay sharciga ka dhigeen in la qaato. Cunugaaga macalinka ayaa la arkaa inuu wakhti galiyo sidii uu ugu diryaarin lahaa imtaxaanka sanadka inta lugu jiro. Hadafka imtaxaanaadkaasii waa in lugu ogaado horumarinta ardayga ee ku aadaan heerka waxbarashada ee Minnesota. Habab kala duwan ayaa u taageeri kartaa cunugaaga ka hor intuuusan qaadana imtaxaanka guud iyo ka dib markii qaataba. Sidoo kale waxaa mihiim ah inaad taageerto hab dhaqanka waxbarasho ee cunugaaga maalinkasta si uu cunugaagu ugu guulgaaro horumarinta sanadlaha ah ee loo baahan yahay.

## Imtaxaanka ka hor

Cunugaagu dugsigiisa iyo/ama macalinka ayaa kuugu soo diraya guriga xiliyada la qaadayo imtaxaanaadka iyo qorshayaasha u diyaar-garowga fasalka. Warbixinada ay tahay inaad ka warqabto waa:

- Maalmaha iyo wakhtiga la qaadayo imtaxaanka
- Muxuu yahay imtaxaanku maxaase lugu ogaanayaa?
- Sidii ayaa u saamaynayaa natiijada imtaxaankaas cunugaaga, dugsiga, ama labadaba?

## Ka caawi cunugaaga meelaha ku adag isaga ama iyada

Hadii uu cunugaagu uu ku liitay meel khaas ah ama maado gaar ah mar hore, waxaa laga inaad caawin karto isaga/iyada iyadoo aad siinayso ku celcelin dheeraad ah si ay ugu fududaato. Buug badan ayaa leh hadaf diyaarin imtaxaan iyadoo ku siiyanaya su'aalo loogu talagalay in wax lugu fahmo su'aalahaas waxay u eeg yihiin kuwa ardaygu uu ku arki doono imtaxaanka. Si taxadar leh diiraada u saara ku celcelinta meelaha uu cunugaagu ku liito si uu u helo wakhtiga dheeraadka ee uu u baahan yahay si ugu celceliyo.

## Dhibaato ka haysto qaadashada Imtaxaanka

Hadii uu cunugaaga ay ka haysto qaadashada imtaxaanka dhibaato, ha isku dayo inuu ku celceliyo su'aalaha hana barto ereyada cusub. Waxaa laga yaabaa in dugsiga cunugaaga ama makatabada ay hayaan imtaxaan u eeg ka uu qaadanayo si uu isticmaalo. Xilaga ha koobnaado, wax-koobana ha noqdaan, hadafkuna ha noqodo mid la gaari karo si waxbarashadan dheeraadka ay u siiso cunugaaga kalsooni.

## Kala falanqood maclinka ama maamulka dugsiga

Hadii aad rumaysan tahay in cunugaaga ay dhibaato ka haysto imtaxaanka guud waxaa laga yaabaa in calaamadaha dhibaataadu ay tahay sida luuqada ama waxbarashada oo ku adag, la hadal maclinka cunugaaga si si aad wax uga ogaato in cunugaagu u qalmo in lugu sameeyo qiimayn.

## Maalinta Imtaxaanka

Hubi in uu cunugaagu uu seexo hurdo fiican subaxdiina uu cuno quraac caafimaad leh. Macalimiin badan ayaa soo wariyay ardayda aan imtaxaanka ku fiicinayn waa kuwa aan seexan hurdo ku filan, ama aan cuni quraac subixii. Samaynta labadaas shay waxay xaqiijinaysaa inuu ku shaqeeyo cunugaagu awood faham oo mug leh.

## Hubi in uu cunugaagu diyaar yahay

Dugsiga ayaa siinaya qalabka uu u baahan yahay cunugaaga si uu imtaxaanka u galo sida qalin-qori, tirtire, warqad, iyo kaankulaytar. Waxaa suura-gal ah inaad cunugaaga siisid cunto fudad ama caagad biyaha maalinta imtaxaanka, ka hubi macalinka cunugaaga waxa loo ogal yahay cunugaaga maalinta imtaxaanka.

## Dabeecad fiican

Sii dhiirigalin fiican, xusuusina cunugaaga inaad u hanweynta tahay shaqada adag ee ay sameeyeen. Sidoo kale deganaantaada waxay ka caawinaysaa cunugaagu inuu degnaado. Hadii uu cunugaagu ka wawelo imtaxaanka wax ku saabsan ama ay u eegtahay uu naxsan yahay xiliga lugu jiro imtaxaanka, ka caawi isaga/iyada habab uu isku dajiyoo

kuwaas uu adeegsan karo marka uu imtaxaanka

qaadanayo